# DADA ISKUULKA & XANAANADA CARUURTA EE XAGAAGA

**Ka hore/Ka dib Iskuulka iyo xanaanada Xagaaga**

Barnaamijyada da'da Iskuulku waxay siiyaan caruurta iyo dhalinyarada meel ay joogi karaan iyadoo nabadgelya ah sidoo kalana ay waxka baran karaan oo ay ku barankaraan xirfadaha muhiimka u ah bulshada.

- Noocee xanaanada caruurta ayaa diyar u ah ilmaha gaaray da'da iskuulka?
- Xagee ayaan ka heli karaa xanaanada ka hor/ka dib iskuulka?
- Maxaan tahay inaan fiiriyo?
- Cunigaygu ma waxa uu diyaar u yahay inuu guriga kaligiis joogo?
- Waa sidee isgaarsiintu?
- Ku xirnaanta Iskuulka degmada
- Sidoo kale fiiri - warar dheeraada oo xanaanada

**Noocee xanaanada caruurta ayaa diyar u ah ilmaha gaaray da'da iskuulka?**

Waxaa jirta laba nooc oo xanaanada caruurta ah oo diyaar u ah caruurta dhigata iskuulka, barnaamijka xanaanada caruurta oo leh lisenka iyo barnaamijyada laga dhaafay. Xanaanada lisenka lehi waxay raacdaa barnaamijyo ay dajisay DSHS ee quseeynaya nabadgelyada, tirada dadka haynaya caruurta, IWM. Barnaamijku waxa uu masuul ka yahay nabadgelyada iyo wanaaga ilmaha inta ay joogaan halkaas. Barnaamijku waxa uu leeyahay waxyaabo qaas ah iyo dhaqdhaqaaqyo gooni u ah ilmaha. Qoysasku waa inay iska diiwaan geliyaan barnaamijka iyo caruurta waxa kaliya oo loo ogol yahay inay raacaan dadka loo fasaxay kaliya. Sidoo kale, barnaamijku waa qaadanayaa lacagta DSHS ee bixinta xanaanada caruurta.

- Waxyaabaha Lisenka
- Lisenada iyo Dacwooyinka

Barnaamijyada laga dhaafay waxay raacaan Sharuucda guud ee guriga oo ay dajisteen barnaamijka shaqsigaas. Caruurtu ma aha inay is diiwaangeliyaansi ay ku soo galaan barnaamijka waxayna iman karaan ama ay bixi karaan markii ay doonaan. Barnaamijkani wax masuuliyada kama sara nabad gelyada caruurta. Dhaqdhaqaaqyada barnaamijkani waxa la dejiyaa maalin ka maalin iyo ma ay raacaan jid u qaasa.

Kor

**Xagee ayaan ka heli karaa xanaanada ka hor/ka dib iskuulka?**

Shaqooyinka Ilaha xanaanada caruurta ayaa waxay ku raadin karaan xanaanada caruurta ee lisenka len oo bixiya ka hor/ka dib iskuulka xanaanaytiisa Shaqooyinkenu waxay kaloo kaa caawini karaan inay kuu helaan barnamijka xanaanada caruurta ee xagaag. Barnaamijyada Bulshada, sida kuwa YMCA, YWCA iyo Boys & Girls Clubs, iyo qeybta baarka iyo cayaaraha, sido kale xanaanada iskuulka ka dib ta ah iyo barnamijyada xanaanada xagaga. Iskuulada qaarkood waxay bixiyaan barnaamijyo dhaxdooda oo iskulka ka hor iyo ka diba.

Waxaad ka heli kartaa barnaamijyada Seattle, Kent iyo Renton iyo kuwa ugu waaweynba iyo datebase-ka online

- Website: http://www.ci.seattle.wa.us/~most/

Jaraa'idka degaanka io joornaalada, sida midka Seattle's Child iyo Eastside Parent, ayaa badanaaba waxay soo qoraan barnaamijyada xiliga Xagaaga.

Kor

**Maxay tahay inaan raadiyo?**

Fiiri meelaha leh meelo kala durugsan ee ilmaha da'dooda ku kala qeybsan ama waxa ay doonayaan. Fiiri nooca dhaqdhaqaaqyada la sameeynayo. Haddii uu jiro isku dheelitir fiican oo banaanka iyo gudahaaba, kooxo yaryar iyo kuwo balaaran dhaqdhaqaaqooda, iyo meel aamusnaan leh. Cunigaadu waa inuu dooran karaa inta u dhaxaysa waxyaabaha macalimiintu ay u sheegayaan iyo kuwa uu asagu dooran karo. Barnaamijyada da'da iskulka waxaa sixi kara xanaanada qaranka ee da'da iskuulka web site-ka

- National School-Age Web Site
- Waxyaabaha la iska eego ee waraysiga bixiyaha xanaanada caruurta (Acrobat)
- Karaadinta bixiyayaasha database-ka online

Kor

**Waa sidee isgaarsiintu?**

Midka ugu daran ee qeybta Xanaanada caruurtu waxa weeye sidee ilmahaygu ku tagayaa barnaamijka ugana imanayaa ilaa iyo guriga. Iskuulada degmada ayaa waxay bixiyaan gaadiidka qaar ka mid ah degaanada iyo qaar badan oo ka mid ah barnaamiyada caruurta da'da iskuulka gaartay ayaa waxay isticmaali karaan basaska iskuulka. Sidoo kale barnaamijyada qaarkood waxay leeyihiin gaadiidkooda u qaaska ah. Haddii aanay iskuulka degmadu ama barnaamijku uusan bixin bas lagu tago loogana soo noqdo iskuulka adiga ayaa masuul ka noqonaya inaad keento oo celiso ilmahaada.

Kor

**Halkaan waxa ah Xiriirinta qaar Iskuulada degmooyinka oo laga yaabo inay kuu hayaan warar dheeraada:**

- Iskuulka degmada Auburn - www.auburn.wednet.edu
- Iskuulka degmada Bellevue - www.belnet.k12.wa.us
- Iskuulka degmada Enumclaw - www.enumclaw.wednet.edu
- Iskuulka degmada Federal Way - www.fwsd.wednet.edu
- Iskuulka degmada Highline - www.hsd401.org
- Iskuulka degmada Issaquah - www.issaquah.wednet.edu
- Iskuulka degmada Kent - www.kent.wednet.edu
- Iskuulka degmada Lake Washington - www.lkwash.wednet.edu
- Iskuulka degmada Mercer Island - www.misd.wednet.edu
- Iskuulka degmada Northshore - www.nsd.org
- Iskuulka degmada Renton - www.renton.wednet.edu
- Iskuulka degmada Riverview - www.riverview.wednet.edu
- Iskuulka degmada Seattle - www.seattleschools.org
- Iskuulka degmada Shoreline - www.shorelineschools.org
- Iskuulka degmada Snoqualmie Valley - www.snoqualmie.wednet.edu
- Iskuulka degmada Tahoma - www.tahoma.wednet.edu
- Iskuulka degmada Tukwila - www.tukwila.wednet.edu

Kor

**Cunigaygu ma waxa uu diyaar u yahay inuu guriga kaligiis joogo?**

Go'aanka aad uga tagaysid cunigaada kaligiis guriga waa go'aan shaqsiyeed oo loo baahan yahay in lagu sameeyo dareenka iyo waaya aragnimada cunigaada. Gobolkan Washington ma laha wax sharciya oo kuu sheegaya da'da ilmaha looga tago guriga kaligood. Caadi ahaan ilmaha ka yar 10 jirka kaligood loogama tago guriga, iyo ilmaha yaryar ee hada dhashayna lagama tago xataa daqiiqado kaligood. Halkaan waxa ah xoogaa su'aala ah oo ay tahay inaad is weydiisid ka hor inata aadan cunigaada kaligiis katagin.

- Cunigadu ma ka cabsadaa inuu kaligii guriga joogo?
- Cunigaadu ma raaca marada sida aad ugu shegtid?
- Ma ku xisaabtami kartaa in cunigaadu uu kuu sheegayo runta?
- Ma ku xisaabtami kartaa in haddii wax shil ah ama degdeg ahi ay dhacaan in uu xalin karo ilmahaadu?
- Cunigaadu si dagan ma u dirsan karaa 911, siin karaa magaciisa oo buuxa (iyo Kaaga) ciiwaanka wadada, iyo telefoon lambarka, iyo macnayn karaa xaalada markaas?

Marka hore waxad ka bilaabi kartaa adigoo waqti yar ka tagaya oo fiirinaya inuu kaligii joogi karo, hubina inuu raali ka yahay oo uusan cabsanaynin.

Kor

**Sidoo kale fiiri**

- Daaweynta meel ka baxsan Guriga
- Raadinta xanaano caruur bixiyayaasha